

Dirida Emailka

Waxaad u diri kartaa iyo ka heli kartaa fariimaha emialka dadka Dugsiyada Dadweynaha Seattle sida macalimiinta iyo ardayda kale.


Fariimaha Emailka

- Dir email
- Warbixin Ku lifaaq
- Ka jawaab email
- Kaydso qoraal ahaan ama iska tirtir Email

Dir Email

Si aad u dirto email:

1. Riix **Fariin Cusub**.
2. Meesha **To**, bilow inaad qorto magaca ugu dambeeya ee qof ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Seattle sida macallin, xubin shaqaale, ama arday.
3. Isla marka aad qoreyso, magacyadu waxay ku soo bixi doonaan liiska natiijooyinka la soo jeediyay. Markaad aragto qofkaas magaciisa iyo kan koowaad, guji magaca, waxayna ka muuqan doontaa **To** field.



Ogaysiin: Waxa kale oo aad qori kartaa cinwaan iimayl oo ku dhammaanaya @ **seattleschools.org**. Waxaad sidoo kale ku dari kartaa wax kabadan hal magac gudaha **To**, **Cc**, ama **Bcc**. Cc (Nuqul kaarboon) waxaa loola jeedaa inaad soo dirayso nuqul emayl ah macluumaadkooda. Bcc (Nuqulka kaarboon-indhoolaha ah) macnaheedu waa inaad direyso koobi, oo aadan dooneynin in dadka kale ay arkaan inaad u direyso qofkaan. Tani way fiicantahay hadaad u direyso emayl dad badan, loomana baahna inay arkaan magacyada iyo cinwaanada dadka kale.

4. **Ku dar ujeedada** adoo ku qoraya mowduuca emaylka. Maxay tahay e-maylku?
5. Ku qabo cursorka gudaha e-maylka ka dibna bilow inaad qorto.
6. Markaad dhammeyso qoritaanka, waad ku hubin kartaa farriinta, ka dib riix Dir (**Send**).


Ogaysiin: Waxaad sidoo kale leedahay ikhtiyaar ah inaad u **dirto** emaylkaaga goor dambe. Haddii aad dooratid inaad dirto xili dambe, dooro taarikhda jadwalka iyo waqtiga aad jeceshahay in farriinta la diro, ka dib riix **dir**. Farriinta lama diri doono illaa wakhtigaas.

Dirida Emailka

Ku dar lifaaq

Si aad ugu darto lifaaq

1. Dhagsii sumadda clip paper si aad ugu darto lifaaq ama fayl.
2. Liis lifaaqyada la soo jeediyay ayaa soo baxaya, oo waxaad dooran kartaa mid ka mid ah feylasha lasoo jeediyay, Baadh kumbuyuutarkan, ama Baadh meelaha daruuraha.



3. Haddii aad doorato **Baar kombuterkaan:**
 - a. Xulo feyl si aad uga geyso kumbuyuutarkaaga.
 - b. Riix **Fur**.
 - c. Waxaad arki doontaa icon-ka faylka oo ka muuqda farriinta.
4. Haddii aad doorato **Baar meel cloud-ka:**
 - a. Waxaa kuu muuqanaya daaqad muujineysa feylashaada ku jira OneDrive.
 - b. Dooro feylka.
 - c. Riix Next, iyo daaqad ayaa ku furmaysa oo ku weydiinayasa *Sidee ayaad u dooneysaa inaad u wadaagto faylkaan?*
 - Haddii aad doorato **Wadaag xiriirkeyga OneDrive**, helayaashu way arki karaan isbadalada oo ay kula shaqeeyaan karaan si dhab ah.
 - Haddii aad doorato **ku lifaaq nuqul**, helayaashu wuxuu helayaa nuqul si ay u eegaan.
 - d. Waxaad arki doontaa icon-ka faylka oo ka muuqda farriintaada.

Ka jawaabida Emailka

Si aad uga jawaabto email:

1. Inboxkaaga dhexdiisa, riix farriin emayl ah si aad horrey ugu Akhriso shaashada.
2. Riix falaarta jawaabta ↶ si aad farriinta dib ugu dirto soo diraha qor farriintaada.
3. Haddii qof loo koobiyeeyo (Cc) fariintan, waxaad dooran kartaa ka Jawaab fallaadhaha oo dhan. ↶
4. Hadaad rabto inaad la wadaagto emaylkaan qof kale, riix fallaarta hore. →
5. Waxaad sidoo kale jeclaan kartaa farriinta adigoo riixaya badhanka suulka kor u taagan. 👍
6. Riix **Dir**.

Si aad u Tuurto Fariin ama ugu Keydsto Qoraal ahaan

1. Haddii aad riixdo **Tuur**, daaqad ayaa soo baxaysa ku weydiinaysa, *"Ma hubtaa inaad rabto inaad tuurto qoraalkan qabyadaa?"*
 - Riix **OK** si aad u tirtirto, iyo farriinta lama diri doono lama keydin doono.
 - Riix **Cancel** si aad dib ugu noqoto ka shaqeynta farriinta.
2. Farriimaha si otomaatig ah ayaa loogu keydiyaa sidii Qoraallayaal qabyo ah ilaa aad riix U **dir** ama **Tuur**.

Dirida Emailka

3. Waxaad dib ugu laaban kartaa Daaqada Faylasha si aad u aragto farriimahaaga oo ku abaabulan faylalka lagu calaamadeeyay: Inbox, Qoraallo Qabyo ah, La diray, ama La Tirtiray.
4. Riix galka **Qoraallada** qabyada oo dooro farriinta aad rabto inaad ka sii shaqayso.

